


2023 - 2024



# DEEQAHA IYO DEEQDA WAXBARASHADA

*Deeqda gargaarka dhaqaale  
ee aadan dib u bixin doonin*

**m** OFFICE OF  
HIGHER EDUCATION



## DEEQAHA WAXBARASHADA IYO DEEQAHA GARGAARKA DHAQAALE EE AADAN DIB U BIXIN DOONIN

Gargaarka dhaqaaluhu wuxuu ku yimaadaa saddex qaab:

- Gargaarku ay tahay inaad dib u bixiso: Amaahyada
- Gargaarka aad heli karto: Waxbarashada shaqada ama Caawimaada Militariga
- Gargaarka dhaqaale ee aadan dib u bixineyn: Deeqaha iyo waxbarashada bilaashka ah

Noocyada kale ee gargaarka waxaa kamid ah gunnooyinka adeega waxbarashada bulshada, barnaamijyada yareeya kharashaadka tuushinka iyo gunnooyinka canshuurta dawlada.



***Bixinta Lacagta Kuleejka waxay noqon kartaa mid qaali ah, laakiin kahor inta aadan qaadan wax amaah ah, eeg inaad u qalanto abaalmarinada deeqdaha iyo waxbarashada bilaashka ah!***

*Sii wad akhrinta si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan deeqaha iyo waxbarashada bilaashka ah - gargaarka deeqda ah ee kaa caawinaya inaad daboosho lacagta waxbarashada kuleejkaaga!*



**BARO XOG BADAN OO KU SAABSAN  
DEEQAHA IYO DEEQDA WAXBARASHADA  
OOD KA HELI KARTO MYHIGHERED**

[www.myhighered.mn.gov/paying-college](http://www.myhighered.mn.gov/paying-college)



... SI HOOSE U EEG GARGAARKA  
DHAQAALAHAA EE AADAN DIB  
U BIXINEYN.

# DEEQAHA

Deequhu waa isha ugu wayn gargaarka dhaqaalaha. Dawladu waxay bixisaa deeqaha ayadoo lagu saleynaayo baahida dhaqaale, oo la go'aamin doono marka aad buuxiso FAFSA.

## Deeqaha Federaalka Pell

Sanadka 2023-2024, Deeqaha Pell waxay gaarayaan \$750-\$7,395 halkii sanad dugsiyeedba. Ardayda ka dhashay qoysaska dakhligoodu gaaraayo \$65,000 waxay u qalmi karaan Deeqaha Federaalka Pell, inkastoo inta badan deeqaha la siiyo ardayda kasoo jeeda qoysaska hela dakhliga hoose.



### U qalmida:

Waxaa laga yaabaa in Deeqda Pell aad ku hesho waxbarashada heerka koowaad ee jaamacada ilaa aad ka dhammaystirayso shahaadada koowaad ee jaamacadda, ama aad hesho deeq u dhiganta 12 simistarada oo waqti buuxa ah, hadba midka soo horreeya. Waxaad u isticmaali kartaa kuleej kasta. Marxaladaha qaar, waxaa laga yaabaa inaad hesho Deeqda Pell ka qayb galka barnaamijka shahaado siinta macalinka kadib qalin jabinta.

### MARKA LAGA IMAADO KASOO BIXIDA SHURUUDAHA U QALMIDA DHAQAALAHAA, ARDAYDU WAA INAY:

- Iska diiwaangeliyaan barnaamij u horseedaya shahaado, shahaadada jaamacada ama dibloomada kuleejka u qalma inuu ka qaybgalo barnaamijka Deeqaha Federaalka Pell
- Haystaan dhibloomada dugsiga sare, oo ay kujiraan dugsiga guriga ama GED. (Sharci dhaafyo ayaa jira)
- Joogteeyaan hormar tacliin oo lagu qanco. Haddii aad hesho gargaarka federaalka ardayda, waa inaad joogteyso buundada celceliska ee "C" aadna hesho heerka buundooyinka looga qalin jabiyo machadkaaga. Waa inaad dhamayso koorsooyin kugu filan teeram walba si aad u qalanjabiso waqtiga saxda ah
- Saxiixaan bayaan ah inaan lagu lahayn lacag celin Deeqda Pell, aana lagu lahayn amaah federaali ah, iyo inaad ogolaatay inaad u isticmaasho kaalmada ardayga ujeedo waxbarasho oo keliya
- Lagu xukumin haysashada ama iibinta daroogooyinka sharci darada ah marka ay helayaan gargaarka maaliyadeed ee federaalka
- Yihiin muwaadiniin Maraykan ah ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma

*Kadib marka aad buuxiso FAFSA-kaaga, waxaa si ootamaatiga ah loo eegayaa inaad u qalanto Deeqda Pell. Majiro codsi gaar ah oo kale ood u baahan tahay si laguugu tixgeliyo deeqdaan.*

# Deeqaha Federaalka Pell

## WAXAAD TAHAY QOF AAN AHAYN MUWAADIN OO U QALMA HADDII AAD:

- Haysato Kaarka Deganaanshaha Rasmiga ah ee (I-551).
- Xaalad jirto oowgeed ku heshay deganaanshaha rasmiga ah ee wata kaarka I-551C.
- Haysato Diiwaanka Imaanshaha Dalka (I-94) oo aad ka heshay Waaxda Amniga Dalka ayna ku qoran yihiin mid kamid ah arrimahaan: qaxooti, oggolaanshaha nabadgelyo doonka, a parolee, qof la kulmay xadgudubka ka ganacsiga dadka, ama qof haysta fiisa T-Visa, soo galootiga Cuban-Hatian.

## Nidaamka Adeega Militariga

Ardayda raga ah waa inay saxiixaan caddeynta xaalada isdiiwaan gelinta taasoo muujinaysa inaad ka diiwaangashan tahay Adeegga Militariga ([www.sss.gov](http://www.sss.gov)) ama inaan lagaaga baahnayn inaad isdiiwaan geliso.

## Waa maxay Nidaamka Adeega Militariga?

Nidaamka Adeegga Militariga waa hay'ad madx banaan oo ka tirsan Dowladda Mareykanka oo ilaalisa macluumaadka ragga laga yaabo inay ka shaqeeyaan hawlaha militariga.

## Sidee ku oggaan kartaa inay tahay inaad iska diiwaangeliso Adeegga Militariga?

Waa qasab inaad isdiiwaangeliso haddii aad tahay nin dhashay Janaayo 1, 1960 ama muddo ka danbeysa, da'diisu tahay 18-25 oo aanad hadda ku jirin shaqada ciidamada qalabka sida. Shuruudaan waxay sidoo kale khuseysaa ardayda aan haysan dukumiintiga aan sharciga ahayn.

## Codsiga:

Waxaa lagu siin doonaa Deeqdaada Federaalka Pell kadib marka aad buuxiso Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Federaalka Ardayda (FAFSA). Waxaad codsan kartaa gargaarka sanad dugsiyeedka 2024-2025 marka la gaaro 2023. *Fiiro gaar ah: 2024-2025 FAFSA waxaa lasoo saaray waqti ka danbeeya waqtigii lasoo saari jiray sababo la xariira wax ka badelka cusub ee FAFSA.*

Eeg [www.ohe.state.mn.us/fafsachanges](http://www.ohe.state.mn.us/fafsachanges) si aad u hesho xog dheeraad ah.

Codsigu wuxuu furnaan doonaa ilaa Juun 30, 2024. Ardaydu waa inay codsadaan sanad walba si loo cusbooneysiyo deeqahooda.



*Deeqda Federaalka Pell waxaa caadiyan la siiyaa kaliya ardayda heerka koowaad ee jaamacada ee muujiya baahiyaha dhaqaale ee daran oo aan wali helin shahaadada koowaad ee jaamacada, aan qalinjabin, ama helin shahaadada xirfadaha.*

*Kaliya buuxi FAFSA si aad u oggaato inaad u qalanto!*



# Deeqaha Gobolka Minnesota

*Barnaamijka Deeqda Gobalka waxaa loogu talagalay inuu bixiyo ikhtiyaar iyo inuu ardayda heerka koowaad ee jaamacada ka caawiyo inay galaan machadyada dugsiga sare kadib ee ku habboon baahiyahooda*



Barnaamijka Deeqaha Gobolka Minnesota waa barnaamij lagu saleeyo baahiyaha oo ay bixiso gobolka waxaana heli kara ardayda aan weli dhigan siddeed simistar oo waqti buuxa ah oo dugsiga sare ah ama wax u dhigma. Si aad u hesho deeqda Gobolka ee teeramka, waa in FAFSA loosoo gudbiyo xarunta hawlaha federaalka markat tahay ama kahor Juun 30 keeda, 2024 oo laga bilaabaayo taariikhda teeramka sanad dugsiiyeedka 2023-24 bilaabanaayo. Celceliska abaalmarinta ardayga ee waqtiga buuxa ah hal sano qiyaas ahaan waa \$2,905.

## U qalmida:

Dadka degan Minnesota ee iska diiwaangeliya ugu yaraan saddex kaarso oo ay ku qaadanayaan shahaadada koowaad ee ardayda barnaamijyada u horseedaya inay shahaado, dignii ama dibloomo ka helaan dugsiga uu ka qaybgelaayo ee Minnesota.


*Inta lagu jiro sanad dugsiiyeedka 2022, 55% ardayda hela Deeqda Gobalka waxay kasoo jeedaan qoys dakhli ahaan hela wax ka yar \$40,000*



## WAXYAABAH LAGA DOONAAYO DADKA DEGAN MINNESOTA:

Si laguugu aqoonsado inaad tahay arday Degan Minnesota, ardaygu waa inuu kasoo baxo MID kamid ah shuruudahaan soo socda:

- Waa inuu yahay arday ka qalin jabiyay dugsiyada sare ee Minnesota asagoo degan Minnesota uuna si toos ah u xaadiro kuleejka (haddii si kumeel gaar ah uu u degan yahay gobal kale).
- Waa inuu GED ka helay Minnesota kadib markuu gobalka ku noolaa muddo ah ugu yaraan dhan hal sano.
- Waa inuu Kunoolaa Minnesota ugu yaraan hal sano uuna ugu noolaa arrimo aan la xariiran ujeedooyin waxbarasho (uusana ka diiwaangashayn in ka badan shan koorso oo ah heerka koowaad ee jaamacada muddo kasta xiligaas).
- Waa in Waalidkiis ay joogaan Minnesota gaar ahaan marka uu soo gudbinayay codsiga gargaarka dhaqaalaha (ardayda waalidka ku tiirsan oo kaliya).
- Waa inuu usoo guuray Minnesota asagoo qaxooti ah kuna sii nuklaaday Minnesota. Wa inuu yahay xaas ama halyeel qof ku tiirsan, haddii halyeygu ku nool yahay Minnesota.
- Waa inuu yahay xubin firfircoon (ama xaas ama qof ku tiirsan) oo ka tirsan Ilaalada Qaranka ee Minnesota ama qaybta kaydka oo ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka oo xaruntoodu ay kutaal Minnesota, oo degan gobalka Minnesota.
- Waa inuu yahay qof ka shaqeyaa Minnesota ahna xubin katirsan (xaas ama qof ku tiirsan) ciidamada qalabka ee Mareykanka ee qabta hawlaha milatariga federaalka.
- Waa inuu usoo wareegay Minnesota 12 kii billood ee madaxwaynuhu ku dhawaaqay bayaanka ka dhanka ah masiibada haddii masiibadu dhib u geysatay waxbarashada ardayga ee dugsiga sare kadib.
- Waa inuu kasoo baxaa shuruudaha ku xusan Xeerka Riyada Minnesota (Booqo [www.oh.e.state.mn.us/MNDreamAct](http://www.oh.e.state.mn.us/MNDreamAct) si aad u oggaato macluumaad dheeraad ah)



## SIDEE DEEQDA SHAQADA EE GOBALKA U SHAQEYSAA?

Deeqaha Gobalka waxay qoysaska hela dakhliga hoose- iyo kuwa dakhligoodu dhexdhexaadka yahay ka bixiyaan kharashaadka waxbarashada ee Kuleejyada iyo jaamacadaha u qalma ee kuyaala Minnesota. Tusalaahaan soo socda wuxuu adeegsadaa xogta 2022-2023.

### Kharashaadka xaadirista waxaa kamid ah:

- Khidmada iyo kharashka tuushinka
- Gunnada caadiga ah ee ay dejisay laanta Sharci dejinta Minnesota looguna talagalay qolka iyo guddiga, buuggaagta, agabka dugsiga, iyo kharashyada kala duwan.



### Tusaale:

Arday ku tiirsan qof kale oo dhigta Jaamacadda Gobolka Minnesota ee qaadanaysa 15 buundooyin halkii simistarba kana soo jeeda qoyska dakhligoodu dhan yahay \$25,000. Expected Family Contribution (EFC, Qoondada Qoyska ee La filaayo) waa \$0.

KHARASHAADKA WAXBARASHADA	KHARASHAADKA XAADIRISTA
Celceliska Khidmada iyo kharashka tuushinka	\$10,030
Nolasha iyo adeegyo kaladuwan Gunnada	\$11,418
<b>Wadarta Guud</b>	<b>\$21,448</b>

Ardaydu waxay u qalmi karaan deeqaha gobalka iyo federaalka oo dhan \$10,724.

KALA DHIGDHIGA KHARASHKA	CADADKA LACAGTA
Waajibaadka Ardayga	\$10,724
Deeqaha Pell	\$6,895
Deeqaha Gobolka	\$3,829
<b>Wadarta Guud</b>	<b>\$21,448</b>

Ardaydu wuxuu meel kale ka heli karaa gargaar deeq oo dheeraad ah. Arrintaan ma saameyneyso Deeqda Pell ama Mida Gobolka.

# Federal Supplemental Educational Opportunity Grant (SEOG, Deeqaha Fursada Waxbarasho ee Dheeraadka ah ee Federaalka)

Deeqda Fursada Waxbarasho ee Dheeraadka ah ee Federaalka waxaa uu abaalmarin siiyaa ardayda aadka u baahan oo waxa ay ku dari karaan lacag dhan \$100 illaa \$4,000 oo deeq lacageed ah xirmada gargaarka maaliyadeed ee ay bixiyaan. Cadadka abaalmarinta waxaa dejiya xafiiska kaalmada maaliyadeed ee machadka waxayna ku xiran tahay helitaanka lacagaha dugsigaaga iyo lacagaha gargaarka kale ee aad heleyso.

## U qalmida:

Kaliya ardayda shahaadada koowaad ee jaamacadda baranaaya ayaa u qalma. Mudnaanta koowaad waxaa la siin doonaa ardayda horey u helayay Deeqda Pell. Ardaydu waa inay yihiin muwaadiniin Maraykan ah ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma.

## Codsiga:

Xafiiska gargaarka maaliyadeed ee dugsigaaga ayaa isticmaali doona natiijooyinkaaga FAFSA si loo go'aamiyo cadadka abaalmarintaada. Waqtiga kama dambeysta ah way ku kala duwan yihiin dugsiyadu, codso sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

# Deeqda Daryeelka Ilmaha ee la bixiyo Dugsiga sare kadib ee Minnesota

Ardayda haysta carruur jira 12 sano iyo kuwa kasii yar (14 iyo ka yar hadday naafo yihiin) oo qaba baahiyo dhaqaale waxay heli karaan gargaar hoos yimada Barnaamijka Deeqaha Carruurta ee Dugsiga Sare ee Minnesota si ay ugu adeegsadaan bixinta kharashka daryeelka ilmaha. Kaalmada dhaqaale waxay dabooli kartaa illaa 40 saacadood asbuucii halkii ilmo oo u qalma. Cadadka abaalmarinta deeqdaan waxaa lagu saleeyaa dakhliga codsadaha iyo xaaska, lambarka qoyska codsadaha, tirada carruurta xaqa u leh ee u baahan daryeelka ilmaha, kharashka dhabta ah ee daryeelka ilmaha, iyo haddii ardaygu ka diiwaangashan yahay waqti maalin buuxda ama maalin barkeed. Deeqaha waxaa loogu talagalay labadaba ardayda dhigta heerka koowaad ee jaamacada iyo kuwa dhigta heerka labaad ee jaamacada.

## U qalmida:

Waxaad u qalantaa inaad codsato deeqda Daryeelka Ilmaha ee dugsiga sare kadib haddii aad:

- Degan tahay Minnesota, oo ay kujiraan xaasaska degan Minnesota iyo ardayda aan haysan dukumiintiga ee u qalma sida ku xusan Xeerka Riyada MN
- Haysato ilmo jira 12 sano ama kasii yar (14 jir ama ka yar haddii uu naafo yahay), kaas oo ka helaya ama ka heli doona daryeel si joogto ah daryeel bixiye haysta ruqsad ama aan haysan ruqsad
- Kasoo baxdo tilmaamaha dakhliga barnaamijka
- Ku diiwaangashan tahay 1-12 buundo ama kasii badan teeramkii (shahaadada koowaad ee jaamacada) ama 1-6 dhibco ama ka badan xilli kasta (qalinjabiyey) machad u qalma
- Tahay arday raadsanayaa barnaamij ama koorso waxbarasho ee khuseysa shahaadada koowaad ee jaamacada, dibloomada ama shahaado
- Tahay arday ku jira heer qooneed oo wanaagsan oo samaynaya horumar lagu qanco oo la xariira shahaadada, dibloomada, ama shahaadada
- Tahay arday aan lagu lahayn lacagta amaahda ee waxbarashada ama, haddii lagu leeyahay, waa inaad sameysay qabanqabo lagu qanco si aad dib ugu bixiso amaahda
- Tahay arday aan helin barnaamijka ardayda wax ku baran karaan gobal kale
- Tahay ardayda dhigta heerka koowaad ee jaamacadda oo aan helin shahaadada koowaad ee jaamacadda ama aan laga diiwaan gelin wax u dhigma siddeed simistar oo buuxa ama 12 rubuc oo waqti buuxa ah (xilli dheeraad ah oo u qalmitaanka ah ayaa diyaar u ah ardayda ka baxday dugsiga hawlaha adeegga milatariga wixii ka danbeeyay Janaayo 1, 2013 ama haddii ay jirto xaalad caafimaad oo weyn). Tahay dhigta heerka labaad ee jaamacada iyo heerka sare ee waxbarashada haystana 4 sano oo u qalimid dheeraad ah kadib markuu helay shahaadada koowaad ee jaamacada
- Helin Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota ama gunnooyinka Barnaamijka Shaqada Kaladuwan ee isla muddada aad helayso deeqda Xannaanada Ilmaha ee Dugsiga Sare kadib. (Ardayga helay abaalmarin ka dibna ka helay gunnooyinka barnaamijka MFIP isla teeramka waa inuu ku wargeliyaa dugsiga 10 maalmood gudahood)

## SIDEE QORSHAHA MAALGELINTA MINNESORA (MFIP) U SAAMEYAA U QALMITAANKAAGA?




Xogta Muhiimka ah

✓ U qalmida

✗ Uma qalmo

! Waxaa laga inuu u qalmo



### Codsiga:

Waa inaad codsato deeqda Daryeelka Ilmaha ee waxbarashada dugsiga sare kadib ayadoo adeegsanaaya xaafiiska gargaarka dhaqaalaha ee dugsigaaga.

# DEEQAHA WAXBARASHADA WAXAY FURSADO SIIYAAN DAD BADAN SI AY U HELAAN SHAHAADADA KOOWAAD EE JAAMACADA AMA AQOONSI WAXBARASHO

## DEEQAHA WAXBARASHADA

*Waxaa la bixiyaa deeqaha waxbarashada ayadoo la raacaayo shuruudaha sida guusha tacliinta iyo ciyaaraha fudud, dhaqanka ama aasaaska diinta ama xirfadaha gaarka ah iyo tayada.*

*Kuleejyada qaarkood waxay ardayda ka doonayaan inay dhammaystiraan borofaylka CSS, qiimayn qotodheer oo baahida dhaqaale ku saabsan.*

Xaqiiji inaad fiiriso xafiiska gargaarka dhaqaalaha ee kuleejka si aad u aqoonsato deeqaha waxbarashada. Inta badan waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomamka codsiga deeqaha waxbarashada marka lagu daro FAFSA, iyo waqtiyada kama dambeysta ah waa kuwo degdeg ah! Si aad u hesho qayb kamid ah liiska deeqaha waxbarashada ee machadyada Minnesota, booqo [www.ohiostate.edu/mnscholarships](http://www.ohiostate.edu/mnscholarships).

*Si ay kaaga caawiyaan inaad oggaato wax diyaarka ah, joogtee akhrinta tilmaamaha sida loo ogaado loona codsado deeqaha waxbarashada, iyo qayb kamid ah liiska deeqaha waxbarashada ee ardayda bulsho gaar ah iyo barnaamijyo:*

### Deeqda Heerka Sare ee Tacliinta MN

Deeqda Heerka Sare ee Tacliinta ee Minnesota waxay caawisaa ardayda muujiya u qalmida heerka sare, guulaha, iyo suurtagalnimada mid kamid ah dhowr mawduuc: Ingiriiska ama hal abuurka qoraalka, fanka habboon, luuqada shisheeye, xisaabta, sayniska, ama cilmiga bulshada.


#### U qalmida:

Ardayda ka qalin jebisay dugsiga sare waa in loo ogolaado inay si buuxda iskaga qoraan barnaamij aan digreeto ahayn, oo shahaadada jaamacadeed lagu helo ee: Jaamacada Minnesota. Jaamacada Gobalka Minnesota, ama Minnesota private, kuleejka deeqda ee lagu helo shahaadada heerka koowaad ama jaamacada.

#### Codsiga:

Si toos ah ula xariir machadka si aad u codsato. Ardaydu waa inay isdiiwaangeliyaan inta lagu jiro sanadka ay dugsiga sare ka qalanjabiyeen, laakiin deeqda waxbarashada waxaa la cusbooneysiin karaa sanadkii waxaana laga dhigi karaa muddo saddex sano ah haddii laga soo baxo qaar kamid ah shuruudaha heerarka tacliinta.





# TILMAAMAHA QAABKA LOO BAARO DEEQAHA WAXBARASHADA

## WAYDII SU'AALO

Inta aad kujirto baaritaankaaga deeqaha waxbarashada, waydiiinta su'aalaha hoose waxay kaa caawinayaan oggaanshaha inuu jiro barnaamij deeq waxbarasho oo kugu habboon iyo xaaladahaaga iyo yoolkaaga waxbarashada.

- Waa maxay deeqda waxbarashada ugu badan ee la bixiyo?
- Deeqda waxbarashada ma hal marbaa mise waa la cusbooneysiin karaa kadib abaalmarinta koowaad?
- Deeqda waxbarashada ma waxaa lagu bixiyaa oo kaliya buundo (majiro miyaa shuruudaha baahiyaha dhaqaale), mise ma waxaa lagu qiimeeyaa labadaba buundo iyo baahi?
- Sidee baahida dhaqaale u qeexaysaa deeqaha waxbarashada ee wax looga qabto baahida?
- Sidee barnaamijka deeqda waxbarashada u qeexaa u qalmida?
- Deeqda waxbarashada ma waxaa looga baahan yahay in la iska diiwaangeliyo barnaamijka deeqda ee lagu helo shahaadada?
- Deeqda waxbarashada ma in la isku diiwaangeliyaa waqti buuxa?
- Waa maxay shuruudaha u qalmida ee kale?
- Deeqda waxbarashada ma waxaa yoolka lagu saaraa machad waxbarasho oo gaar ah, waxbarasho gaar ah ama xirfad, dad aad deegaan oo gaar ah degan, shahaadada heerka koowaad, ama shahaadada mastarka ama barnaamijyada heerka dhogtareedka?
- Qofku ma inuu qoraa bayaan ama qoraal shaqsi?
- Mala iska rabaa warqadaha soojeedinta?
- Ma muhiimbaa wareysi?
- Waa maxay habraaca codsiga?

## LA XARIIR MACHADYADA XAAFADAADA


Baar deeqaha waxbarashada ee laga heli karo xaafadaada ama machadkaaga waxbarashada. Guud ahaan, waxaad haysataa fursada ugu fiican ee aad ku heli karto deeqaha waxbarashada ee laga helo ilahaan.

## LA SOCO WAQTIGA KAMA DANBEYSTA AH EE DEEQAHA WAXBARASHADA

Waqtiga kama danbeysta ah ee deeqaha waxbarashada waxay noqon karaan lix ilaa sagaal billood oo laga bilaabaayo xiliga sanad dugsiyeedka, ayadoo laga yaabo in qaar kale ay u dhaw yihiin bilowga teeramka deyrta. Sidoo kale qaar kamid ah barnaamijyada deeqaha waxbarashada waxay aqbalaan codsiyada gu'a iyo teeramyada xagaaga.

## OGOOW SIDA KULEEJKAAGA U KHUSEEYAAN DEEQAHA WAXBARASHO EE DIBADDA

Dugsiyo badan ayaa ardayda u oggolaada inay ku daraan deeqaha waxbarashada dibeda kaalmada dhaqaalaha dugsiya bixiyo. Arrintaan caadiyan ma saameeyo xidhmada kaalmada dhaqaalaha ardayga ilaa in kaalmada dhaqaalaha ee guud (oo ay kujiraan deeqda waxbarashada dibeda) ay dhaafto cadadka guud ee xaadirista. Haddii sidaas dhacdo, marka koowaad waxaa la yareeyaa amaahyada iyo waxbarashada-shaqada. Hase yeeshee, qaar kamid ah machadyada waxay yareeyaan deeqaha waxbarashada doolar-ka-doolarka ah ama deeqaha la siiyo marka ardayda helaan deeqaha waxbarashada dibada. Ka hubi arday kasta ama wax ka waydii siyaasadooda.



## Deeqaha Waxbarashada Gaarka ah

Ururo bulsho oo badan, hay'ado, shirkado, naadiyo, dadwayne, iyo kooxaha dhaqanka ayaa bixiya deeqaha waxbarashada bilaashka ah.

### HADDII AAD RAADINAYSO ILO GAAR AH AHNA GARGAAR DHAQAALE, WAA INAAD:

- Waydiiso shirkadaada / shirkada qoyskaaga, ururo xirfadlayaal ah, ama ururka shaqaale.
- Waydiiso in shirkadaadu leeyahay siyaasad waxbarasho oo lacag siisa shaqaalaha si ay iskaga qoraan koorsooyinka dugsiga sare ee la xariira shaqada.
- Waydiiso ururada bulshada sida Rugta Ganacsiga, Kaniisadaha, ama Naadiyada Rotary.
- Waydiiso lataliyaha dugsiga sare.
- Ka baarto baraha oonleenka ah adoo adeegsanaaya mid kamid ah baraha laga baaro deeqaha waxbarashada bilaashka ah ee hoose.

### WEBSEEDYADA LAGA BAARO DEEQAHA WAXBARASHADA

CollegeNet • [www.collegenet.com](http://www.collegenet.com)

FastWeb • [www.fastweb.com](http://www.fastweb.com)

Deeqaha Xarumaha waxbarashada Bilaashka ah ee Minnesota • [www.ohe.state.mn.us/mnscholarships](http://www.ohe.state.mn.us/mnscholarships)

Scholarships.com • [www.scholarships.com](http://www.scholarships.com)

Gollayaasha Ururada dadka aan caddaanka ahayn ee Minnesota (MnACC) ee loogu talagalay Deeqaha waxbarashada BIPOC •

[www.mnacc.org/scholarships](http://www.mnacc.org/scholarships)

LeadMN - Deeqaha waxbarashada Kuleejka Bulshada 2-sano • [www.leadmn.org/scholarships](http://www.leadmn.org/scholarships)

Deeqaha Waxbarashada Ururada Ardayda (Students United Scholarships) [www.studentsunited.org/scholarships](http://www.studentsunited.org/scholarships)

Baaritaanka Deeqaha waxbarashada Kuleejka Raptor • [www.collegeraptor.com/scholarship/search](http://www.collegeraptor.com/scholarship/search)

*Raadi oo codso inta badan deeqaha waxbarashada ee aad awoodo - waa lacag bilaash oo loogu talagalay kuleej ama dugsiga xirfadaha!*



WAXAA LAGA YAABAA INAAD U  
QALANTO DHEEFAHA KAALMADA  
DHAQAALAHA EE XAALADAHA  
NOLASHA QAAR KAMID AH



# KAALMADA DHAQAALE EE LOOGU TALAGALAY DADWAYNE GAAR AH

*Waxaa laga yabaa inaad hesho kaalmo dheeraad ah ayadoo lagu saleynaayo shuruudo ka baxsan baahidaada shaqaale. Barnaamijyada halkaan lagu qeexay waa kaliya kuwa la heli karo.*

## Barnaamijka Fursada Deeqda ee Alliss ee loogu talagalay Dadka Waaweyn ee Ku laabanaya Barnaamijka Deeqda Fursada Kuleejka Labada Sano

Deeqaha waxay diyaar u yihiin ardayda baahida dhaqaale u qaba inay dhigtaan Kuleejyada Gobolka Minnesota, ee iska diiwaan galiyay A.A., A.S., A.A.S., A.F.A., dibloomada, shahaadooyinka, iyo koorsooyinka MnTC ee loogu talagalay in loogu badelo barnaamijyada baccalaureate.

### *U qalmida:*

- Dadka helaaya waa inaysan horey u helin shahaadada imtixaanka baccalaureate.
- Dadka helaaya qasab ma ahan inay ku nool yihiin Minnesota.
- Deeqaha waxaa loo adeegsan doonaa oo lagu abaalmarin doonaa nidaamka codsiga kaalmada maaliyada ee caadiga ah ee kuleejka waxaana laga yaabaa in loo isticmaalo in lagu daboolo baahida hadhay kadib marka ardaygu helo Deeqaha Gobolka ee Pell iyo/ama MN.
- Dadka helaaya waxaa laga doonayaa inay la kulmaan lataliye si ay u abuuraan qorshe dhameystirka imtixaanka baccalaureate. Kulankaan waxaa inuu dhacaa inta lagu jiro simistarka la bixiyay abaalmarinta.



### **HABRAACA ABAALMARINTA:**

Hanaanka lagu doorto dadka helaaya Deeqda Fursada ee Alliss waxay ku kaladuwan yihiin kaambaasyadu. Fadlan la xariir xaafiiska gargaarka dhaqaalaha ee kuleejka aad dhiganayso (ama aad qorsheyneyso inaad dhigato) si aad u hesho xog dheeraad ah.



## DEEQDA WAXBARASHADA MADAXABANAAN EE ARDAYDA KUJIRAY DARYEELKA KORNIINKA

*Deeqda waxbarashada madaxabanaan ee ardayda kujiray daryeelka korniinka waa barnaamij bixiya dhaqaalaha waxbarashada sare oo awooda saara inuu meesha ka saaro caqabadaha qabsada dadka reer Minnesota ee kujiray daryeelka korniinshaha.*

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo [www.ohe.state.mn.us/figs](http://www.ohe.state.mn.us/figs)



## Deeqaha loogu talagalay Dhallinta daryeelka korniinka kujiray

Dadka degan Minnesota oo da'doodu ka yar tahay 27 sano oo horey ugu jiray nidaamka daryeelka korniinshaha waqti uun kadib markii ay gaareen da'da 13sano ayaa laga yaabaa inay u qalma Deeqda waxbarashada madaxabanaan ee ardayda kujiray daryeelka korniinka. Deeqdu waxay dabooshaa kharashka xaadirista dugsi kasta oo u qalma kuna yaala Minnesota ama ka qaybgalata kuleej iyo jaamacad gaar loo leeyahay.

### U qalmida:

- Waa inaa tahay qof degan Minnesota, oo ay kujiraan ardayda codsada kaalmada dhaqaale ee loo maro Codsiga Xeerka Riyada MN (MN Dream Act Application)
- Waa inaad ka yar tahay 27 sano da' ahaan
- Waa inaad dhigato Dugsi dadwayne oo Minnesota kuyaala ama waa inaad xaadirto machad waxbarasho sare bixiya oo gaar loo leeyahay
- Waa inaad u qalanto Foojarada Waxbarashada ee loogu talagalay Dhallinta Horey ugu jiray Daryeelka korniinka AMA aad gashay daryeelka korniinka kadib 13-sano jirkaagii kadib oo kuyaalay Minnesota, oo ay kujiraan mid uun kamid ah kuwaan soo socda:
  - » Hadaad gashay xarunta korniinta waqti kasta intaad gaartay da'da 13 ama kasii wayn;
  - » Hadaad gashay xarunta korniinta waqti kasta intaad gaartay da'da 13; ama
  - » Hadaad gashay xarunta korniinta aad heshay masuuliyad sharciyeed rasmi ah waqti uun kamid intaad jirsatay 13 sano
  - » Waxaad ka qalinjabisay dugsi sare ama waxaad dhameysay waxbarasho u dhiganta sida ay ansixisay Waaxda Waxbarashada
  - » Waa lagaa aqbalay codsiga, ama waxaad hadda xaadirtaa, machad u qalma
  - » Waxaad soo gudbisay FAFSA ama Codsiga Xeerka Riyada ee Minnesota
  - » Waxaad kasoo baxday Heerka Tacliinta Qanaacaada sida lagu qeexay machadkaaga

### Codsiga:

Helida deeqda waa wax u fudud sida loo buuxiyo FAFSA ama codsiga Xeerka Riyada Minnesota. Labada codsiba waxaa kujira su'aal ku saabsan daryeelka korniinka; Waaxda Minnesota ee Adeegyada Dadwaynaha waxay xaqiijinaysaa xogtaada. Haddii aad u qalanto, machadkaaga dugsiga sare kadib ayaa u bixin doona deeqda sida qayb kamid ah xidhmada kaalmada dhaqaale.

# Foojarada Waxbarashada iyo Tababarka ee loogu talagalay Dhallinyaradii hore ee Daryeelka

Dhallinka hadda kujira ama horey ugu jiray daryeelka korniinka ayaa heli kara \$5,000 halkii sanad dugsiyeedba oo loogu talagalay waxbarashada dugsi sare kadib ee kuleejka, jaamacada, xirfada, dugsiyada farsamada ama ganacsiga. Barnaamijka foojarka Tababarka iyo Waxbarashada Minnesota (ETV) wuxuu bixiyaa deeqaha, loo adeegsan karo khidmadaha iyo waxbarashada, buugaagta, guriyeynta, daryeelka ilmaha, gaadiidka iyo kharashaadka kale ee dugsi. Booqo webseedka Waaxda Adeegyada Dadwaynaha oo ah [www.mn.gov/dhs](http://www.mn.gov/dhs) si aad u ogaato xog dheeraad ah ama la xariir (651) 431-4663 ama [dhs.etvcoordinator@state.mn.us](mailto:dhs.etvcoordinator@state.mn.us) haddii aad qabto su'aalo.

## U qalmida:

Waa inaad ka yar tahay da'da 26 sano marka la gaaro taariikhda kama dambeysta ah ee codsiga, lagugu aqbalay barnaamij dugsi sare kadib, waan inaad kasoo baxdo ugu yaraan mid kamid ah shuruudaha soosocda:

- Waa inaad kujirtay daryeelka korniinka 30 maalmood oo isku xiga intaad jirtay 17 sano
- Waa inaad kujirtay daryeelka korniinka markaad jirtay 16 sano ama kasii wayn
- Waa in maxkamad kuu wareejisay cid si rasmi ah masuuliyadaada u qaada iyo goob masuuliyad lagaana wareejiyay daryeelka korniinka intaad jirtay 16 sano ama kasii wayn
- Ayadoo la raacaayo masuuliyada gobalka ama qabiilka, waxaad kujirtay daryeelka korniinka markaad gaartay 18 sano, waxaana la joojiyay ama la xanibay xuquuqaha waalidnimo ee waalidkaa

Haddii aad tahay arday ETV ee soo laabanaya, waa inaad sameynayso horumar ku aadan dhameystirka waxbarashadaada.

## Deeqaha waxbarashada ee loogu talagalay Ardayda aan Caddaanka ahayn

Waxaa jira barnaamijyo dhowr ah oo gaar ah oo bixiyaha deeqaha waxbarashada ee loogu talagalay Ardayda aan Caddaanka ahayn. Webseedka kuleejkaaga ka baar deeqaha waxbarasho oo loogu talagalay qowmiyadaada.

## Barnaamijka Deeqda Jaamacada

Deeqahaan waxay diyaar u yihiin ardayda baahida dhaqaale u qaba inay dhigtaan Jaamacadaha Gobolka Minnesota. Ardayda waa in laga qoraa barnaamijka waxbarashada heerka koowaad ee jaamacada oo ah maalin buuxda. Deeqaha waxbarashada kuma koobna oo kaliya ardayda haysta buundada waxbarashada ee ugu sareysa; 40 boqolkiiba kamid ah fasal kasta iyo ardayda haysta buundooyinka hoose ayaa u qalma in lagu sameeyo tixgelin.

## Kaalmada Shaqaalaha Barakacay

Barnaamijka Shaqaalaha Barakacay wuxuu u adeegaa shaqaalaha ka tagay shaqadoodii ay muddo hayeyn. Barnaamijyadaan waxay awooda saaraan kor u qaadista xirfadaha shaqada hadda la heli karo, tababarka, waxayna bixiyaan adeegyada kaalmada ah. Waydii xog ku saabsan Barnaamijyada Shaqaalaha Barakacay xarumaha Shaqada ee deegaankaaga.

Booqo [www.positivelyminnesota.com/dw](http://www.positivelyminnesota.com/dw) si aad u hesho xarunta ugu dhaw.

## Ardayda Dhagoolayaasha ah ama Indhoolayaasha ah

Dadka degan Minnesota ee dhigta Jaamacadda Minnesota ee indho la'aanta ah waxay xaq u yeelan karaan in laga dhaafdo kharashka tuushinka jaamacadda. Dadka degan Minnesota ee dhigo la'aanta ah oo u qalma deeqda Pell ama Deeqda Gobalka waxay xaq u yeelan karaan kharashka waxbarashada iyo kharashka kuleejyada dadwaynaha ama jaamacadda ay dhigtaan. La xariir xaafiska kaalmada dhaqaalaha kuleejka si aad u hesho xog dheeraad ah.

# Xaasaska iyo qofka ku tiirsan Sarkaalka Amniga Dadwaynaha

Carruurta ku tiirsan iyo xaaska uu ka dhintay sarkaalka amniga dadwaynaha ee lagu dilay gudashada waajibaadkooda waxay xaq u leeyihiin inay helaan gunnooyinka waxbarashada ayadoo loo maraayo Barnaamijka Deeqaha Dadwaynaha ee Dadka Ciidamadu ka dhinteen.

## U qalmida:

Si aad ugu qalanto abaalmarintaan, waxaa inaad qof ku tiirsan tahay ama aad tahay xaaska shaqaale ka shaqeen jiray arrimaha amniga dadwaynaha lana diray asagoo gudanaaya waajibaadkiisa shaqo markay ahayd ama kadib Janaayo 1, 1973. Qof qofka kale ku tiirsan waa inuu kasoo baxo shuruudahaan soosocda:

- Waa inuu ka yar yahay 23 sano ama ka yar yahay 30 sano jir haddii uu ka shaqeeyay waajibaadka ciidanka muddo dhan 181 maalmood oo isku xigta ama ka badan, si sharaf lehna looga fariisay shaqada ama loo fasaxay
- Waa inuu ka diiwaangashan yahay barnaamijka heerka koowaad ee jaamacada uuna dhigto mid ka mid ah machadyada dugsiga sare kadib ee Minnesota ee ka qaybqaata barnaamijka deeqda dawladda
- Waa inay yihiin xaasas nimankooda ka dhigteen da' kasta iyo qof kutiirsan qof kale oo ka yar 23 sano ayaa sidoo kale u qalma inay adeegsadaan abaalmarinada waxbarashada heerka labaad ee jaamacada.

## Codsiga:

Codsadayaashu waxa ay u baahan yihiin in ay xaqiijinta xaq u yeelashada geeyaan xafiiska gargaarka maaliyada ee dugsiga ay dhigtaan ama ay qorshaynaayan in ay dhigtaan. Xaqiijintaan waxaa laga heli karaa Waaxda Minnesota ee Badqabka Dadwaynaha.

## Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada North Star Promise

*Waa deeq cusub oo ka dhigta kuleejka mid ay awoodi karaan dad badan oo reer Minnesota*

Laga bilaabo deyrta 2024, Barnaamijka Deeqda Waxbarashada ee North Star Promise (NSP) ayaa ka dhigi doona kuleejka mid la awoodi karo ay awoodi karaan qof kasta oo reer Minnesota ah oo raba inuu helo xirfado waxbarasho. Barnaamijku wuxuu dabooli doonaa kharashka guud ee waxbarashada iyo kharashaadka dadka reer Minnesota ee dhigta machadyada dadwaynaha iyo kuleejyada qabiilka ee gobalka kuyaala. Xog buuxda ka raadi [www.ohio.state.mn.us/northstarpromise](http://www.ohio.state.mn.us/northstarpromise).




## U qalmida:

- Waa inaad degan tahay Minnesota waana in qoyskaagu helaa dakhliga guud ee Hoose (AGI) sida lagu qeexay Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Dhaqaalaha ardayga (FAFSA) ama Codsiga Xeerka Riyada Minnesota ee ka hooseya \$80,000
- Waa inaad dhigato Machadka dadwaynaha ee Waxbarashada sare oo Minnesota kuyaala ama Kuleej Qabiil
- Waa inaad xaalad gobal ama federaal oo cakiran oo amaah kujirin
- Waa inaad ka qoran tahay diiwaangelin qaadanaysa ugu yaraan hal buundo
- Waa inaad kasoo baxdo heerarka Horumarka Tacliinta ee Qanaacaada leh (SAP)
- Waa inaad horey u helin shahaadada baccalaureate
- Waa inaad ka diiwaangashan barnaamij ama koorso waxbarasho ee khuseysa shahaadada koowaad ee jaamacada, dibloomada ama shahaado

# Hindida Maraykanka ee Ardayda ah

Ardayda Hindida Mareykanka ah ee Minnesota degan waxay xaq u yeelan karaan kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah oo uu bixinaayo gobolka Minnesota, Xafiiska Arrimaha Hindida ee Mareykanka, iyo qabiilkooda.



## Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Hindiyaanka ah ee Minnesota

Deeqda waxbarashada waxaa heli kara ardayda Hindida Mareykanka ee xaqa u leh ahna ardayda dhigata heerka koowaad ee jaamacada ugu yaraan saddex teeram ama ardayda heerka labaad ee jaamacada ee iska diiwaangeliyay waxbarashada maalinta barkeed la dhigto.

### U qalmida:

Si aad ugu qalanto deeqdaan waxbarashada, waxaa inaad:

- Waa in qoyskaagu kasoo jeedo hal-afar jiil ama qoys in badan ah Hindida Mareykanka AMA waa inaad tahay xubin diiwaangashan ama muwaadin kamid ah Qabiil Hindida Mareykanka oo Federaalku aqoonsan yahay ama Qowmiyada koowaad ee Kanadiyaanka
- Degan tahay Minnesota sababo la xariira ujeedooyinka gargaarka dhaqaale;
- Ka diiwaangashan tahay kuleej la aqoonsan yahay, jaamacad ama dugsiga xirfadaha Minnesota; iyo
- Tahay ardayd dhigta heerka koowaad ee jaamacada una qalma Deeqda Gobalka iyo Pell; ardayda heerka labaad ee jaamacada waa inay soo bandhigaan baahida.

### Codsiga:

Ardaydu waa inay buuxiyaan FAFSA ayna dhameystiraan codsiga [www.ohe.state.mn.us/indianscholarship](http://www.ohe.state.mn.us/indianscholarship).  
Waqtiga kama danbeysta ah ee mudnaanta leh si loo dhameystiro waa Luulyo 1.

## Nala soo xariir si aad u hesho xog dheeraad ah iyo foomamka codsiga:

Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Hindiyaanka ah ee Minnesota ee Xafiiska Waxbarashada Sarre ee Minnesota  
Taleefoonka: (651) 642-0567 or (800) 657-3866  
limaylka: [info.ohe@state.mn.us](mailto:info.ohe@state.mn.us)

### Ma maqashay xog ku saabsan...

## Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Hindiyaanka Ameerikaanka ah ee Minnesota

Barnaamijkaan cusub wuxuu bixin doonaa waxbarashada doolarka koowaad iyo hiigsiga kharashkiisa la bixiyo oo loogu talagalay qof walba oo degan Minnesota oo ah xubin diiwaangashan ama muwaadin kamid ah qabiil federaalku aqoonsan yahay ama Qowmiyada Koowaad ee Kanadiyaanka si uu u galo Machadka Gobalka Minnesota ama Jaamacada Minnesota. Arday kasta oo aan deegaanka deganayn oo ah xubin diiwaangashan ama muwaadin kamid ah Qabiil Dalka Aqoonsan yahay ayaa sidoo kale u qalma barnaamijka.

Deeqda loogu talagalay barnaamijkaan waa dhawaan lagu uruuriyay Kalfadhiga Sharci dejinta 2023. Si aad u hesho xogihii ugu dambeeyay, booqo [www.ohe.state.mn.us/mnamericanindianscholars](http://www.ohe.state.mn.us/mnamericanindianscholars).

# Hindida Maraykanka ee Ardayda ah ee laga dhaafaayo Kharashka Tuushinka

Hindida Maraykanka ee Ardayda ah ee laga dhaafaayo Kharashka Tuushinka ee dhigta Jaamacadda Minnesota-Morris waxay aqoonsan tahay asalka kambaaska inuu yahay Dugsiga Golaha Hinida ee Morris oo la aasaasay 1800meeyadii. Hindida Maraykanka ee Ardayda ah ee dhigta Jaamacada Minnesota—Morris waxay codsan karaan kharash dhaafidaan ayadoo soo gudbinaaya codsiga dhaaftaanka kharashka tuushinka ee Hindida Maraykanka iyo dukumiintiga la aqbali karo.

## U qalmida:

Si ay ugu qalmaan dheeftaan, ardayda waa in laga aqbalaa xafiiska diiwaangelinta jaamacada, waa inay dhameystiraan codsiga reebida Waxbarashada Hindida Mareykanka, waa inayna keenaan dukumiintiga dhaxalka Hindida Mareykanka, oo ay kujiri karaan kuwaan soo socda:

- Dukumiintiga muujinaaya kamid noqoshada Qabiilka oo ay qabiil Hindi Ameerikaan ah oo federaalki aqoonsan yahay;
- Shahaado muujinaysa inaad tahay Hindi dhalad ah; iyo
- Dukumiintiyada hidaha ee Hindida Maraykanka ee kale.

## Codsiga:

Ka buuxi codsiga [www.morris.umn.edu/equitydiversity/financial/aitw](http://www.morris.umn.edu/equitydiversity/financial/aitw).

Ardayda qaba su'aalaha waxay wici karaan (800) 992-8863 ama iimayl udir karaan [morrisfa@morris.umn.edu](mailto:morrisfa@morris.umn.edu).

## Barnaamijka Waxbarashada Native American Promise

Dhaqangalaya dayrta 2023, 100% waxbarashada loogu talagalay u qalmaya dakhliga ama ka hela wax ka yar \$125,000 waxaa kharashkooda lagu dabooli doonaa Barnaamijka Waxbarashada Native American Promise. Barnaamijku wuxuu bixiyaa taageero maaliyadeed oo la taaban karo oo ay helaan ardayda fasalka koowaad ee jaamacadda iyo beddelka ardayda kulliyadaha Qabiilka. Si loo tixgeliyo, ardayda waa in la seexiyaa mid ka mid ah afar \* Jaamacadaha Minnesota (Crookston, Duluth, Rochester ama Twin Cities), buuxi FAFSA, waa inay buuxiyaan shuruudaha dakhliga qoyska, oo ay noqdaan muwaadin ka diiwaangashan mid ka mid ah 11 ka qowmiyadood ee federaalku aqoonsan yahay kuna nool Minnesota.

Xog badan ka baro [system.umn.edu/native-american-promise-tuition-program](http://system.umn.edu/native-american-promise-tuition-program).

## Barnaamijka Waxbarasho Buuxda ee Aqoonsiga Hindida Maraykanka

Barnaamijka Waxbarashada Dayrta ee Hindida Mareykanka ee la aqoonsan yahay ee Augsburg wuxuu awooda saaraa taageerada iyo kor u qaadista muhiimada ardayda Hindida Mareykanka ee kujira kaambaaska. Si aan lamid ahayn in badan oo kamid ah machadyada dadwaynaha, barnaamijka Augsburg u qalmida kuma koobo oo kaliya ardayda Hindida Mareykanka ee kunool gobalka. Barnaamijku wuxuu qeexayaa "Hindida Ameerikaanka ah" oo ah xubin ka diiwaangashan qabiil kamid ah Hindida Mareykanka oo la aqoonsan yahay, Alaskan Native Village, ama Qowmiyada Koowaad ee Kanadiyaanka, ama farac toos ah (ilmo ama awoowe) xubin ka diiwaan gashan ama qabiil ahaan la xaqiijiyay. Barnaamijku wuxuu u furan yahay ardayda hadda diiwaangashan iyo sidoo kale sanadka cusub iyo kuwa cusub ee ardayda dhigata shahaadada koowaad ee jaamacadda.

Markay ahayd Dayrta 2022, barnaamijku wuxuu u furan yahay ardayda wakhtiga buuxa ah ee hadda is-diiwaangeliyay ama ardayda sannadka koowaad ee dhowaan la ogolaaday, ardayda u badelanaysa wakhtiga buuxa, iyo ka qaybgalayaasha mid kasta oo ka mid ah barnaamijka dhammaystirka shahaadada dadka waaweyn ee Augsburg. Xog badan ka baro [www.augsburg.edu/american-indian-recognition](http://www.augsburg.edu/american-indian-recognition).

EEG BARNAAMIJYADAAN XIRFADA  
EE GAARKA AH EE KAA CAAWIN KARA  
INAAD ISKA BIXISO KULEEJKA!

# GARGAAR DHAQAALE EE LOOGU TALAGALAY BARNAAMIJYO GAAR AH



*Ayadoo ay ku xiran tahay qorshooyinka xirfadahaaga mustaqbalka ama mawduuca waxbarashada, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto qaar kamid ah deeqaha waxbarashada ama barnaamijyada dib u bixinta amaahda.*

## Hindisaha Kaalmada Kalkaalisada Jiilka Xigga

Ayadoo loo maraayo Hindisaha Kaalmada Kalkaalisada Jiilka Xigga, waxaad si buuxda ugu qalmi kartaa kaalmada heerka gelista oo aan wax lacag ah lagaaga qaadeyn. 2023 sharci dejintu waxay meelmarisay maalgelino si loo sii wado barnaamijka loona bixiyo tababar kaalmada kalkaalisada oo bilaash ah iyo taageero la siiyo dadka reer Minnesota oo xiiseynaya inay helaan xirfado ayna kor u qaadaan xirfadahooda daryeelka caafimaadka.

Dadka iska diiwaangeliyay kalkaalisada ayagoo u maraya hindisaha waxay heli doonaan kharashka guud ee tababarkooda, buugaagtooda, alaabahooda, waxaana laga bixin doonaa kharashka imtixaanka shahaadada. Marka la xaqiijiyo, kalkaalisoooyinka kaalmaatiga waxay codsan karaan jagooyinka xarun kasta oo bixisa daryeelka muddada dheer, isbitaal, iyo guryaha halyeeyada Minnesota. Booqo [www.ohs.state.mn.us/cnatraining](http://www.ohs.state.mn.us/cnatraining) si aad u hesho xogtii ugu danbeysay.

## Deeqaha waxbarashada Daryeelka Degdega ah

Billoowga sanadka 2024, dadka degan Minnesota waxay heli karaan deeqaha waxbarashada si ay u dhameystiraan dhibloomada daryeelka degdega ah ama dhigrii. Barnaamijkaan deeqda ee cusub ahna kumeel gaarka wuxuu bixin doonaa \$5000 halkii sanaba wuxuuna siin doonaa ardayda ka qaybgalaya barnaamijka daryeelka degdega ah. Dhammaan barnaamijyada u qalma waxay ardayda ka doonayaan inay waqti xaadirkaan ruqsad ka haystaan Farsamada Caafimaadka Degdega ah (Emergency Medical Technical, EMT) kahor inta aysan bilaabin barnaamijka. Machad kasta waxa uu leeyahay shuruudo gaar ah.

Booqo [www.ohs.state.mn.us/paramedic](http://www.ohs.state.mn.us/paramedic) si aad u hesho liiska barnaamijyada u qalma iyo xog dheeraad ah. Waxaa la heli doonaa codsi kadib Janaayo 1, 2024.



## Barnaamijyada Cafiska Amaahda Xirfadaha Caafimaadka ee uu Gobolka bixiyo

Waxda Caafimaadka ee Minnesota gaar ahaan Xafiiska Caafimaadka Reer Miyiga iyo Daryeelka aasaasiga ah ayaa maamula barnaamijyada cafiska amaahda ee lagu leeyahay xirfadlayaasha caafimaadka ee ka shaqeeya meelaha baahida badan ka jirto. Barnaamijku wuxuu caawiyaa xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee ruqsada haysta isaga oo siinaya lacag deyn bixinta inta uu shakhsigu u adeegayo meel miyi ah ama gabaabsi ah oo Minnesota ah. Waxaa u qalma xirfadahaan soo socda:

**Dakhaatiirta Miyiga iyo Magaalada:** Daryeelka aasaasiga ah, dakhtarka bulshada, daawada gudaha, OB/GYN, dakhaatiirta carruurta, dakhaatiirta xanuunada dhimirka

**Dhakhaatiirta xirfadaha dhexe:** Kalkaalisada caafimaadka, kalkaalisada caafimaadka maskaxda, kalkaalisada dhakhtar, umuliso kalkaalisada shahaado haysato, kalkaalisada suuxinta iyo kalkaalisada caafimaadka sare ee takhasuska

**Kalkaalisada:** Kalkaaliyaal wax ku ool ah oo ruqsad haysta, kalkaalisooyin diiwaangashan iyo kalkaalisooyin caafimaad dadweyne

**Xirfadlayaasha Caafimaadk Miyiga iyo Magaalada:** Khabiir cilmi-nafsi oo ruqsad haysta, Shaqaalaha Bulshada ee Rugta Madaxa bannaan ee Shatiga u haysta (LICSW), Guurka Shatiga & Dhakhtar Qoyska (LMFT), La-taliyayaal Ruqsad haysta (LPCC), iyo La-taliyayaasha Khamriga iyo Maandooriyaha Shatiga u haysta (LADC)

**Dhakhaatiirta Ilkaha:** Dhakhaatiirta Ilkaha ama dhakhaatiir ruqsad haysta

**Farmashiilayaasha:** Dhakhaatiirta tababarka kujira ee barnaamijka farmashiyaha ama farmashiilayaasha ruqsada haysta

- **Dakhaatiirta Koorsada Daryeelka Caafimaadka ee kahortaga cudurada:** Ardayda kujira waxbarashada si ay u noqdaan macalimiin bixiya daryeelka caafimaadka kahortaga cudurada.
- **Xarunta Kalkaalisada:** Ardayda kujira waxbarashada si ay u noqdaan macaliin kalkaalisooyin ah.



### Codsiga:

Codsiyada waxaa laga heli karaa barta oonleenaan: [www.health.state.mn.us/facilities/ruralhealth/funding/loans/index.html](http://www.health.state.mn.us/facilities/ruralhealth/funding/loans/index.html)

Waxda Caafimaadka Minnesota  
Xafiiska Caafimaadka Reer Miyiga iyo Daryeelka  
aasaasiga ah

Teleefanka: (651) 201-3870 ama (800) 366-5424

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xariir: [health.loanforgiveness@state.mn.us](mailto:health.loanforgiveness@state.mn.us)

## Barnaamijyada Amaahda ee Xirfadaha Caafimaadka

Deeqo waxbarasho oo kaladuwan oo federaalku bixiyo iyo barnaamijyo dayn ayay heli karaan ardayda xiisaynaysa xirfadaha caafimaadka, sida kalkaalisada, dhakhtarka ilkaha, farmashiyaha, adeegyada indhaha, ama daawadooyinka. Barnaamijyada laga heli kambaaska waxaa kamid ah Barnaamijka Daynta Ardayga ee Xirfadaha Caafimaadka, Barnaamijka Amaahda Daryeelka Koowaad, Amaahda Ardayda Danyarta ah, iyo Barnaamijka Amaahda Ardayga kalkaalisada ah.

### Codsiga:

Ardaydu waa inay la xariiraan xaafiska kaalmada shaqaale ee dugsiyada uu ka diiwaan gashan yahay ama uu isku dayaayo inuu iska diiwaangeliyo. Booqo [www.hrsa.gov](http://www.hrsa.gov) si aad u barato xog dheeraad ah. La xariir [flrpinfo@hrsa.gov](mailto:flrpinfo@hrsa.gov) haddii aad qabto su'aalo.

# T.E.A.C.H. Early Childhood® MINNESOTA

T.E.A.C.H. Early Childhood® MINNESOTA waxay bixisaa deeqo waxbarasho sare oo loogu talagalay xirfadlayaasha daryeelka carruurta ee dhigta fasalka lagu barto shaahadada ama shahaadada koowaad ee waxbarashada dhallaanka, waxbarashada gaarka ah ee dhallaanka, ama korniinka ilmaha. Xog badan waxaa laga heli karaa [www.childcareawaremn.org](http://www.childcareawaremn.org).



## Deeqaha Macalinka Ardayda Minnesota

Deeqaha Macalinka Ardayda Minnesota waxay kaalmo dhaqaale oo ah waxbarashada dugsiga sare kadib siisaa ardayda xaqa u leh ee iska diiwaan galiyay barnaamijyada iskidiyaarinta macalinimada Minnesota inta lagu guda jiro hal xilli oo ardaygu kasoo baxaayo shuruudaha 12da usbuuc ama in kasii badan oo ah waayo-aragnimada waxbarida ardayga. Waxaa jira labo deeq oo la heli kara marka la eego u qalmiinta:

**Deeqaha Macalimiinta Ardayda Minnesota ee Meelaha Deeq Yaridu ka jirto** (oo waagii hore loo yaqaanay Deeqda Musharaxa Macallinka) waxay siisaa kaalmo maaliyadeed dugsi sare ka dambeeya ardayda u qalanta kuwaas oo doonaya inay wax ku dhigaan meel shati yaraan ama degmada dugsiyeedka miyiga ka dib markay qalin jabiyaan oo ay helaan shatiga waxbarida.

**Deeqda Macalinka Ardayga ee Dad reer Minnesota ee aan Mataalada Habboon Lahayn** waxay bixisaa kaalmada dhaqaalaha dugsiga sare kadib oo ay siiso arday u qalma pp katirsan qowmiyadaha ama jinsiyadaha aan ku jirin macaliminta shaqaalaha Minnesota.

### U qalmida:

- Waa inaad ka diiwaan gashan tahay kuleejka ama jaamacada Minnesota ee u qalma barnaamijka iskidiyaarinta macalinimada ee u baahan ugu yaraan 12 asbuuc oo waxbarasho ah;
- Waa inay joogteeyaan hormar tacliin oo lagu qanco;
- Waa inaad muujiso inaad qabto baahi dhaqaale; iyo
- Waa inay kasoo baxaan mid ama in ka badan oo ah shuruudaha soo socda:
  - Waxaan la rabaa inuu wax ka dhigo degmo dugsiyeedka miyiga ee Minnesota
  - Waxaa la rabaa inuu wax ka dhigo aagaga waxbarashadu ku yar tahay ee la xaqiijiyay
  - kuwa katirsan qowmiyadaha ama jinsiyadaha aan ku jirin macaliminta shaqaalaha Minnesota
- Ardaygu waa inuu codsi buux usoo gudbiyaa Xafiiska Minnesota ee Waxbarashada Sare xilliga ardaygu kasoo baxaayo shuruudaha 12da usbuuc ama in kasii badan oo ah waayo-aragnimada waxbarida ardayga.

### Codsiga:

- Qaybta Ardayga waxaa kujira dhammaan xogaha la doonaayo ee bixiyay iyo taariikhaha;
- Codsii bilaash ah oo loogu talagalay Gargaarka Federaalka ee Ardayda (FAFSA) ama Codsiga Xeerka Riyada Minnesota; iyo
- Qaybta Kuleejka ama Jaamacada oo uu buuxiyey wakiil sharci u haysta oo katirsan kuleejka ama jaamacada aad dhigato oo ay ku jiraan dhammaan macluumaadka loo baahan yahay.



Xog badan ka baro [www.ohe.state.mn.us/studentteachergrants](http://www.ohe.state.mn.us/studentteachergrants)

# Barnaamijka Dib u Gudida Daynta Macalimiinta Meelaha Gabaabisku ka jiro

Macalimiinta bixiya casharrada fasalka ee meelaha macalimiinta ku yar yihiin ee gobalka Minnesota waxay xaq u yeelan karaan kaalmada dib u bixinta deynta ardayga oo dhan \$1,000 sannadkii illaa guud ahaan lacag dhan \$5,000 oo ah abaalmarinaha dib u bixinta. Ujeedada barnaamijka waa in lagu dhiirigeliyo macalimiinta inay waxbaraan Minnesota gaar ahaan meelaha uu gabaabsiga waxbarasho kajiro iyo dugsiyada degmadooyinka miyiga.

## U qalmida:

Guud ahaan, codsadayaashu waa inay hadda:

- Haystaan ruqsada macalinimada oo uu bixiyo Shatiga Macalimiinta Xirfadlayaasha ah iyo Guddiga Heerarka.
- Ka shaqeeyaan dugsi degmadeedka si ay u bixiyaan waxbarashada fasalka
- Waa in lagu leeyahay dayn waxbarasho oo heerkeedu sareeyo; iyo
- Wax ka baraan goobta shatiga ee gabaabsigu ka jiro, wax ka baraan dugsiyada degmada miyiga ah, ama waa inay tirsan yihiin qoomiyad ama qoomiyad aan matalayn shaqaalaha macalimiinta ee Minnesota.

## Codsiga:

- Codsadayaashu waa inay codsadaan sanadkii xafiiska Minnesota ee Waxbarashada Sarre [www.ohes.state.mn.us/teachershortageloanrepayment](http://www.ohes.state.mn.us/teachershortageloanrepayment). Dadka codsanaaya ee kasoo baxa shuruudaha u qalmiitanka guud waxaa laga doonayaa inay bixiyaan dukumiinti dheeraad ah si loo xaqiijiyo macluumaadka lagu bixiyay codsiga.



# Barnaamijka Tijaabada Macallimiinta aan Caddaanka ahayn ee Minnesota

Barnaamijka Tijaabada Macallimiinta aan Caddaanka ahayn ee Minnesota wuxuu siiyaa kaalmo maaliyadeed dugsiga sare kadib ardayda u qalantay shahaadada koowaad ee jaamacadda iyo ardayda qalin jabisay ee isku diyaarinaya inay noqdaan macalimiin, soo bandhigay baahi dhaqaale, oo ka tirsan kooxaha jinsiyadaha ama qowmiyadaha aan matalayn shaqaalaha macallimiinta ee gobolka.



## U qalmida:

- Waa inaad ka diiwaangashan tahay machad ku yaala Minnesota:
  - » Guddiga Heerarka iyo Ruqsada Macalinka Xirfadaha (PELSB) ayaa ansixiyay barnaamijka diyaarinta macalinka ee doonaya shatiga bilowga ah; ama
  - » Barnaamij labo sano oo gaar ahaan loogu talagalay in lagu diyaarito macaliinta ilmaha yaryar;
- Waa in ardaygu yahay Hindida Mareykanka ee aan caddaanka ahayn;
- Waa inay joogteeyaan shuruudaha hormar tacliin oo lagu qanco (SAP) sida lagu qeexay machadka;
- Codsiga bilaash ah oo loogu talagalay Gargaarka Federaalka ee Ardayda (FAFSA) iyo Codsiga Xeerka Riyada MN ee sanadka gargaarka;
- Waa inaad muujiso inaad qabto baahi dhaqaale

## Codsiga:

Ardayda xiiseynaysa waa inay buuxiyaan FAFSA ama Codsiga Xeerka Riyada MN kahor inta aysan dhameystirin codsiga Deeqda Macaliinta aan Caddaanka ahayn ee Minnoesta.

Booqo [www.ohiostate.edu/asp/teaching/teachingofcolor/scholarship](http://www.ohiostate.edu/asp/teaching/teachingofcolor/scholarship) si aad u hesho xarunta ugu dhaw.



# WAX KA BARO BARNAMIJYADA LA HELI KARO EE KAA CAAWIN KARA INAY BIXIYAAN KHARASHKA WAXBARASHADA



## KULEEJKAAGA

### Barnaamijyada Lagu barto Shaqada

Waxaa laga yaabaa inaad hesho lacag aad iska bixiso kharashka waxbarashadaada adoo ka shaqaynaya shaqooyinka maalinta barkeed ah ee laga helo gudaha ama meelaha ka baxsan kambaaska ayadoo loo maraayo barnaamijka Waxbarashada Shaqada ee Federalka ama Barnaamijka Waxbarashada Shaqada ee Minnesota. Dugsiyada waxaa laga yaabaa inay ku jiraan shaqada waxbarashada oo qayb ka ah xirmada gargaarka dhaqaale. Ardayda ka qaybqaadanaysa waxay shaqeeyaan celcelis ahaan 15 saacadood asbuucii waxaana laga yaabaa inay helaan \$3,000 ama in kasi badan sanadkii. Xafiiskaaga gargaarka dhaqaale waxaa uu tixgalin doonaa cadadka abaalmarinta barashada shaqada, jadwalka, xirfadaha shaqada, iyo barnaamijka tacliinta si loo go'aamiyo inta saacadood ee aad shaqayn karto.



*Xafiiska gargaarka dhaqaale ee dugsiga aad dhigato ayaa go'aamiya cadadka abaalmarinta waxbarashada.*

#### *U qalmida:*

Ardayda Heerka Jaamacada koowaad iyo heerka labaad waxay u qalmaan labadaba barnaamijyada lagu barto shaqada ee gobalka iyo kan federaalka.

Si ay ugu qalmaan barnaamijka barashada shaqada federaalka, ardaygu waa inuu:

- Yahay muwaadin ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma;
- Yahay arday barnaamijka lagu helo digriiga, shahaadada, ama dibloomada;
- Ka diiwaangashan yahay Adeega Militariga haddii uu yahay nin;
- Inaan lagu lahayn amaah;
- Yahay arday aan lagu xukumin haysashada ama iibinta daroogooyinka sharci darada ah marka uu helaayo gargaarka maaliyadeed ee federaalka; iyo
- Haysto hormar tacliin oo lagu qanci karo.

Si uu ugu qalmo barnaamijka barashada shaqada Minnesota, ardaygu waa inuu:

- Yahay arday degan Minnesota waana inuu dhigtaa dugsiga Minnesota;
- Yahay arday ka diiwaangashan barnaamijka buundada ee ugu yaraan lix saacadood ah oo uu ka helaayo digrii, shahaado, ama diblooma;
- Haysto hormar tacliin oo lagu qanci karo; iyo
- Yahay arday aan dukumiinti sharci ah haysan sida hoos timaada DACA haystana oggolaanshaha shaqada ayaa u qalma maalgelinada.

#### *Codsiga:*

Xafiiska gargaarka dhaqaalaha ee dugsiga aad dhigato ama aad qorsheyneyso inaad dhigato ayaa isticmaali doona natiijoyinka FAFSA-gaaga ama Codsiga Sharciga Riyada (ardayda aan sharciga haysan) si loo go'aamiyo u qalmitaankaaga daraasadda shaqada.



## GUNNOOYIN WAXBARASHADA HALYEYADA

Marka laga yimaada kaalmada dhaqaalaha, xubnaha ciidanka qalabka sida iyo halyeyada waxay ka faa'ideysan karaan dhowr kamid ah barnaamijyada kaalmada dhaqaale si ay u qaataan shahaado.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan gunnooyinka waxbarashada halyeyada, booqo [www.mymilitaryeducation.org](http://www.mymilitaryeducation.org)



## Kaalmada Gargaarka ee Adeega Militariga

Dadka loogu yaraan inay ka qaybqaataan hawlaha waajibaadka inta ay ku jiraan kuleejka waxay helayaan dhowritaan gaar ah oo ku saabsan u qalmitaanka kaalmada dhaqaale, heerka diiwaangelinta, iyo bixinta deynta. Inta badan marxaladaha, ardayga laguma ciqaabi doono maqnaanshiisa ama maqnaanshaheeda si uu u qabto adeeg ciidan oo firfircoon. Xog dheeraad ah ka hel xaafiskaaga gargaarka dhaqaalaha. Haddii hadda ka shaqeyso mid kamid ah liisaska laamaha militariga, si toos ah u waydiiya waaxdaada rrimaha ku saabsan gunnooyinka waxbarashada. Waxaa intaas dheer, waxaa jira gunnooyin waxbarasho oo federaalku iyo gobolku bixiyo oo loogu talagalay ardayda kasoo shaqaysay ama ka tirsan ciidamada qalabka sida. *Fadlan ogsoonow in dhammaan barnaamijyada aan loo adeegsan karin dhammaan noocyada tababarka.*

### SHARCIGA FEDERAALKA GI BILL® EE KA DANBEEYAY-9/11

Sharciga GI ee ka danbeeyay-9/11 wuxuu gunnooyin waxbarasho oo dhan illaa 36 billood siiyaa halyeyada u qalma. Sharcigu wuxuu dhaqan galay Agoosto 1, 2009. Waxa laga yaabaa inaad u qalanto haddii aad haysatay ugu yaraan 90 maalmood oo adeeg wadareedka ah markay taariikhdu tahay ama kadib Sebteembar 11, 2001 ama haddii lagaa saaray wixii ka dambeeyay Sebteembar 11, 2001 adiga oo naafo ah oo ku xiran adeegga 30 maalmood kadib.

### SHARCIGA FOREVER GI® BILL

Sharciga Forever GI wuxuu soo gabagabeynayaa xadka 15-sano ee Sharciga Forever GI ee 9/11, ee oggolaanaya isticmaalka gunnooyinka noloshu kuwa la sii daayay Janaayo 01, 2013.

### FEDERAALKA – SHARCIGA MONTGOMERY GI BILL® – MILITARIGA HUBKA SIDA

Sharciga Montgomery GI - Militariga hubka sida wuxuu gunnooyin waxbarasho oo dhan illaa 36 billood siiyaa halyeyada u qalma. Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto haddii aad ka qaybqaadatay hawlaha waajibaadka markii ugu horreysay kadib Juun 30, 1985 oo aad dooratay inaad bixiso barnaamijka, aad shaqaysay laba sano ama ka badan oo waajibaad firfircoon ah, si sharaf leh lagaaga saaray, oo aad haysato shahaado dugsi sare ama mida GED.

### Codsiga:

Booqo [www.gibill.va.gov](http://www.gibill.va.gov) si aad u hesho xog cusub oo ku saabsan gunnooyinka, ama la xirii Iskuduwaha Gobolka ee Waaxda Arrimaha Halyeyada ee kaambaaska aad doorato inaad ka qaybgasho. Booqo [www.mymilitaryeducation.org](http://www.mymilitaryeducation.org) si aad u hesho Iskuduwaha Kaambaaska deegaanka. Si aad u barato xog dheeraad ah, la xariir hay'ada ee gargaarka dhaqaalaha ama Waaxda Minnesota ee Arrimaha Halyeyada.

## Barnaamijka Kaalmada Tuushinka Federaalka (FTA)

Ilaalada Qaranka ee sida Ciidanka iyo Kaydka ayaa laga yaabaa inay u qalmaan barnaamijkaan inta ay sii wadayaan aqoon kasta illaa shahaadada heerka labaad ee jaamacada. Xubnaha ciidanka waa inay waydiiyaan waaxdooda ama iskuduwaha Barnaamijka Halyeeyada Waxbarashada Sare arrimaha la xariira u qalmida iyo macluumaadka codsiga. Kani ma ahan gunno daamad qaad leh waxaana lagu bixisaa sida loo soo kala horeeyo, ayadoo lagu saleynaayo qofka marka koowaad imaaday. Caadiyan, waa inaad soo gudbisoo codsiga kahor inta teeramku bilaaban.

### Codsiga:

Booqo [www.armyignitED.com](http://www.armyignitED.com) ama la xariir Iskuduwaha Gobolka ee Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee kaambaaska aad doorato inaad dhigato. Sidoo waxaad booqan kartaa [www.mymilitaryeducation.org](http://www.mymilitaryeducation.org) si aad u hesho Iskuduwaha Kaambaaska deegaanka.

## Dheefaha Gobalka ee Halyeeyada Militariga

### Sharciga Minnesota GI Bill ®

Sharciga Minnesota GI wuxuu siiyaa maalgelin codsadayaasha ardayda waqtiga buuxa iyo kuwa maalinta qaybteed dhigta shahaadada Ciwaanka IV, heerka koowaad ee jaamacada, dibloomada ama barnaamijka qalin-jabinta. Codsadayaashu waxay heli karaan lacag dhan \$5,000 halkii sanaba.



### U qalmida:

Waa inaad tahay arday degan Minnesota dhigtana xarun waxbarasho oo kutaala Minnesota:

- Waa inaad tahay halyeey si sharaf leh uga soo shaqeeyay waax kasta oo katirsan ciidamada qalabka sida ee Maraykanka waqti kasta; ama
- Waa inaad tahay qof aan halyeey ahayn oo si sharaf leh u shaqeeyay guud ahaan shan sano ama in ka badan isagoo xubin ka ah Ilaalada Qaranka ee Minnesota ama waax kasta oo dadka u adeega ama ciidamada kayd ah oo ka tirsan ciidamada qalabka ee Maraykanka, iyo aad ka shaqaysay qayb kasta hawlahaan ka maid ah markay ahayd ama wixii ka danbeeyay Sebteembar 11, 2001; ama
- Waa inaad tahay xaas ama ilmo ku tiirsan oo uu dhalay qof kamid ahaa ciidamada waqti kasta, oo dhintay ama qaba naafo guud iyo mid joogto ah taas oo ay sababtay natiijada tooska ah ee shaqada militariga.

### Codsiga:

La xariir xaafiiska gargaarka shaqaalaha ee dugsiya, Waaxda Minnesota ee qaabilsan Arrimaha Halyeeyada adoo kawacaaya [www.gibill.mn.gov](http://www.gibill.mn.gov) ama wac 888-546-5838 haddii aad qabto su'aalo. Sidoo kale waxaay dooran kartaa inaad la xariirto Iskuduwaha Gobolka ee Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee kaambaaska aad doorato inaad dhigato. Booqo [www.mymilitaryeducation.org](http://www.mymilitaryeducation.org) si aad u hesho Iskuduwaha Kaambaaska deegaanka. Waxaa lagaa dooni karaa inaad keento dukumiinti la xariira shaqada militariga.



# Kaalmada Waxbarashada Minnesota ee loogu talagalay Halyeeyada

Gobolka Minnesota wuxuu bixiyaa kaalmo waxbarasho oo loogu talagalay halyeeyada ka qayb gala machad waxbarashada dugsiga sare kadib ee kuyaala Minnesota. Halyeeyada waxay u qalmi karaan khidmad hal mar oo dhan \$750.

## U qalmida:

Si aad xaq ugu qalanto, waa in aad keento bayaanka kasoo baxay Waaxda Arrimaha Halyeeyada Maraykanka oo muujinaysa inaad isticmaashay dhammaan gunnooyinka waxbarashada federaalka ee la heli karo; waana inaad deganayd Minnesota lix billood kahor inta aadan kusoo biirin ciidamada qalabka sida.

## Codsiga:

La xariir Waaxda Arrimaha Halyeeyada Minnesota, ama la xariira Iskuduwaha Gobolka ee Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee kaambaaska aad doorato inaad dhigato. Booqo [www.mymilitaryeducation.org](http://www.mymilitaryeducation.org) si aad u hesho Iskuduwaha Kaambaaska deegaanka ee kuugu dhaw.

# Xaasaska ay ka dhinteen Ciidamada Minnesota/Gunnooyinka kutirsanaanta Waxbarashada

Xaaska ama ilmaha uu dhalay halyeey dhintay oo ku dhintay shaqada niilitariga aahana qof deganaa Minnesota waxa laga yaabaa in uu xaq u yeesho in uu helo lacag dhan illaa \$750 sanadkii asagoo ka helaaya Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee Minnesota. Xaasaska xaqa u leh iyo kuwa ku tiirsan waxay sidoo kale u qalmi karaan gelitaanka kuleejyada dadwaynaha iyo jaamacadaha Minnesota ayagoo ku dhiganaaya qaab lacag la'aan ah ilaa ay ka dhammeeyaan shahaadada koowaad ee jaamacadda ama wax u dhigma.

## U qalmida:

Si uu ugu qalmo, ardaygu waa inuu noqdaa xaaska ciidamada dhintay ama qof ku tiirsanaa halyeey dhintay oo ku dhintay shaqada ciidamada ahaana qof deganaa Minnesota markii uu soo galayay ciidamada qalabka sida ee Mareykanka ama degenaa ugu yaraan lix bilood kahor intuuusan u dhiman sababo la xariira naafanimo ay keentay shaqada. Ardaygu waa inuu Minnesota u degan yabay sababo la xiriira kaalmada dhaqaale ee gobolka uu buuxiyo waana inuu kasoo baxo shuruudaha hormarka tacliimeed ee lagu qanci karo ee kuleejkiisa ama jaamacadiisa u degsan.

## Codsiga:

La xiriir Xafiiska Arrimaha Halyeeyada ee degmada aad ku nooshahay ama Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee Minnesota ee kutaala:

Veterans Services Building, 2nd Floor  
20 West 12th Street  
St. Paul, MN 55155  
Teleefanka: (651) 296-2562  
Webka: [www.mdva.state.mn.us](http://www.mdva.state.mn.us)

Xogta Gunnooyinka Waxbarashada Militariga  
Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee Minnesota  
Khadka Xiriirka Halyeeyada: 1-888-546-5838  
<https://mn.gov/mdva>

Barnaamijka Waxbarashada Sare ee Halyeeyada  
[www.mymilitaryeducation.org](http://www.mymilitaryeducation.org)

Kaalmada Tuushinka Federaalka ee Ilaalada Qaranka  
[www.armyignitED.com](http://www.armyignitED.com)

Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee Maraykanka  
[www.gibill.va.gov](http://www.gibill.va.gov)

Xafiiska Waxbarashada Sarre ee Minnesota  
[www.ohe.state.mn.us/military](http://www.ohe.state.mn.us/military)

# Lacag celinta Waxbarashada Gobolka Minnesota (STR) ee Ciidamada hawada iyo Ilaalada Qaranka ee Qalabka sida

Barnaamijka Lacag celinta Waxbarasho ee Minnesota wuxuu kaalmo dhaqaale siiyaa xubnaha Ilaalada Cirka iyo Ciidanka Qaranka Minnesota. Barnaamijku wuxuu dib u bixiyaa kharashka xubnaha koorsada shaqada dhigta oo dhameeyay dugsii kasta, kana yaala gudaha gobolka ama meel ka baxsan gobolka, ee loo oggolaaday gunnooyinka askarta.

## U qalmida:

Waa inaad tahay xubin firfircoon oo katirsan Ciidanka Minnesota ama Ilaalada Qaranka Cirka ee dhigta koorsada heerka koowaad iyo heerka labaad kana dhigta dugsii kasta oo loo oggolaaday gunnooyinka halyeeyada. Ardayda u qalma waxay adeegsan karaan Kaalmada Waxbarashada Federaalka iyo Lacag celinta Waxbarashada Gobolka, illaa (laakiin aan ka badnayn) 100 boqolkiiba waxbarashada iyo kharashaadka dugsiga.



## U qalmida Dadka kutiirsan ee Soo badbaaday:

Haddii xubin katirsan Ilaalada Qaranka ee Minnesota la dilo asagoo kujira shaqada gobolka ama adeegga firfircoon ee gobolka ee uu federaalku maal geliyo, xaaska xubinta ka badbaaday iyo ku tiirsanayaasha nool ee aan gaarin da'da 24 sano waxay xaq u yeelanayaan kharashaadka waxbarashada.

## Codsiga:

La xiriir Xafiiska Arrimaha Halyeeyada ee degmada aad ku nooshahay ama la xiriir Iskuduwaha Gobolka ee Waaxda Arrimaha Halyeeyada ee Minnesota ee kaambaaska aad dooratay inaad gasho.

Booqo [www.mymilitaryeducation.org](http://www.mymilitaryeducation.org) si aad u hesho Iskuduwaha Kaambaaska deegaanka.

Bogga webka: <https://mn.gov/mdva/resources/education/survivingspousebenefit.jsp>

## AmeriCorps

AmeriCorps waa dadaal iskaashi oo ay sameeyaan wakaaladaha deegaanka iyo dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada si ay u bixiyaan adeegga bulshada ee dalka oo dhan ka jira. Boqolaal fursadaha adeegga bulshada ah ayaa diyaar u ah inay ka caawiyaan maal gelinta qayb kamid ah waxbarashada ardayga ka qaybqaadanaaya machad kasta oo federaalku aqoonsan yahay. Ardayda heerka labaad ee jaamacada ee AmeriCorps waxay heli karraan gunnooyinka amaahda waxbarashada.

## U qalmida:

Si aad ugu qalanto boosaska AmeriCorps, waa inaad tahay 17 jir ama kasi wayn tahay, waa inaad haysato shahaado dugsii sare ama GED (ama aad dhameyneyso GED), oo aad tahay muwaadin Maraykan ah ama qof aan muwaadin ahayn.

## Codsiga:

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan AmeriCorps, booqo [www.americorps.gov](http://www.americorps.gov). Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha, wac ServeMinnesota adoo ka wacaaya (612) 333-7740, ama booqo [www.serveminnesota.org](http://www.serveminnesota.org).



WAXAAD ISKA QORI KARTAA WAXBARASHADA  
GOBALADA KALE EE LA AWOODI KARO



# BARNAAMIJYADA ISDHAAFSIGA IYO WAXBARSHADA LA DHIMAY



*Minnesota waxay heshiisyo isdhaafsi waxbarasho la gashay dawladdaha dariska ah iyo gobollada Kanada si loo dhimo caqabadaha gelitaanka dadka aan gobalka deganayn.*

Si aad ula socoto xogtii ugu danbeysay ee isdhaafsi, booqo [www.oh.state.mn.us/reciprocity](http://www.oh.state.mn.us/reciprocity).

## Isdhaafsi Tuushinka

Minnesota waxay heshiisyo isdhaafsi waxbarasho la gashay Wisconsin, North Dakota, South Dakota, iyo Manitoba. Ardayda (oo ay kujiraan ardayda aan sharciga lahayn ee u qalma sida ku xusan Xeerka Riyada MN) waa inay codsadaan gunnooyinka isdhaafsi waxbarashada waana inay sidaas sameeyaan isla marka ay ogaadaan inay dhiganayaan machad u qalma. Haddii aad horey ka codsato waxay xaqiijinaysaa in ardayda lagu soo dalaci doono qiimaha waxbarashada ee isdhaafsi marka ay iska diwaangeliyaan fasalada. Codsiyada la helo kadib maalinta ugu dambeysa ee xilli dugsiyeedka waxay kaliya khuseeynayaan shuruudaha xigga. Majiro kharash lagaaga qaadaayo codsashada isdhaafsi.

Oonleen kaga codso [www.oh.state.mn.us/reciprocity](http://www.oh.state.mn.us/reciprocity). Codsiyadu waxa ay diyaar noqonayaan 1 da Maarso gaar ahaan dayrta soosocota.



*Gunnooyinka isdhaafsi waxaa si ootamaatiga ah loogu cusboonaysiiyaa Minnesota, Wisconsin, North Dakota, iyo South Dakota ardaydii helay buundooyinka dugsiya sare kadib 12 kii billood ee la soo dhaafay.*

Ardayda aan sharciga lahayn ee u qalma sida uu dhigaayo Xeerka Riyada MN waa in ay buuxiyaan codsiya warqada ah haddii aysan haysan lambarka amniga bulshada.



**BOOQO WEBSEEDKEENA**  
si aad u hesho xog dheeraad  
ah oo ku saabsan isdhaafsi!



# Waxbarashada isdhaafsiga ee Gobalka iyo Deegaanka

## ISDHAAFISGA MINNESOTA/WISCONSIN

Dhammaan barnaamijyada shahaadada koowaad ee jaamacadda iyo shahaadada labaad ee jaamacada waxaa heli kara dadka degan labada gobol, marka laga reebo barnaamijyada xirfada daawada, caafimaadka xoolaha, iyo dhakhtarka ilkaha ee Jaamacadda Minnesota-Twin Cities iyo Duluth iyo Jaamacadda Wisconsin-Madison.

## ISDHAAFISGA MINNESOTA/NORTH DAKOTA

Dhammaan barnaamijyada shahaadada koowaad ee jaamacadda iyo shahaadada labaad ee jaamacada waxaa heli kara ardayda sameynaaya isdhaafsiga. Qaar kamid ah barnaamijyada xirfadaha ayaa sidoo kale kujira; waxyaabaha ka reeban waa: sharciga, farmashiyaha, iyo daawada.

## ISDHAAFSIGA MINNESOTA/SOUTH DAKOTA

Dhammaan barnaamijyada shahaadada koowaad ee jaamacadda iyo shahaadada labaad ee jaamacada waxaa heli kara ardayda sameynaaya isdhaafsiga, oo ay kujiraan qaar kamid ah waxbarashada xirfadaha sare.

## ISDHAAFSIGA MINNESOTA/MANITOBA

Dadka degan Minnesota iyo Manitoba ee raba inay helaan faa'iidooyinka isdhaafsiga waxbarashada waa inay la xiriiraan dugsi ay doonayaan inay iska diwaangeliyaan.

## BARNAAMIJKA ISWAYDAARSIGA ARDAYDA MIDWEST

Dadka degan Minnesota (oo ay kujiraan ardayda aan sharciga haysan ee u qalma sida ku xusan Xeerka Riyada MN) waxay iska diiwaangelin karaan barnaamijyo tiro xadidan ah oo la doortay ahna machadyo dadwayne iyo kuwo gaar loo leeyahay oo bixiya waxbarashada ka danbeysa dugsiyada sare ee Indiana, Kansas, Missouri, Nebraska iyo Ohio ayadoo la dhimay heerka qiimaha tuushinka ayadoo loo marayo barnaamijka Iswaydaarsiga Ardayda Midwest. Ardayda degan Minnesota ee dhigta ama qorsheynaya inay dhigtaan machad dadwayne oo kuyaal Waqooyiga Dakota ama Wisconsin waa inay codsadaan isdhaafsi. Ardayda ka diiwaanshan waxbarashada masaafada ah ama dhammaan barnaamijyada oonleenka ah ee sii jooga guriga uma qalmaan isdhaafsiga Wisconsin.





## Ogeysiisyo dheeraad ah

A series of horizontal dotted lines for writing.



## Ogeysiisyo dheeraad ah

A series of horizontal dotted lines for writing.



[www.ohe.state.mn.us](http://www.ohe.state.mn.us)  
[www.myhighered.mn.gov](http://www.myhighered.mn.gov)



1450 Energy Park Drive, Suite 350

Saint Paul, MN 55108-5227

**Taleefoonka:** (651) 642-0567

**Lambarka Bilaashka ah:** (800) 627-3529

**Fakiska:** (651) 642-0675

**limaylka:** [info.ohe@state.mn.us](mailto:info.ohe@state.mn.us)

© 2023 Minnesota Office of Higher Education